

Xaallada dadka waaweyn



Tima goíd dhalida ka dambaysa

Qodoba Muhiim ah

- Tima goída ha dambaysa dhalida tima joogta ah maaha
- Caadatan ilaa 100,000 oo tima ah ayaa madaxa ku yaal badanaana 50-200 oo tima ah ayaa goá maalin walba
- Hormoonka heerkiisa siyaada marka uurka la leeyahay ayaa keena madaxa timaha ku yaallaa siyaadaan ka badan intii caadiga ahayd
- Dhalitaanka ka dib heerka hormoonku wuxuu ku noqdaa caadigiisii laba ilaa saddex bilood ayaa jira tima goíd badan waxayna ku dhamaataa laba ilaa saddex bilood
- Tima bixidu waxay caadi ku soo noqonaysaa saddex ilaa lix bilood laga soo bilaabo marka timuhu bilaabeen inay goáan
- Tima goídu waxay dhici kartaa uur yeelasha kasta gadaasheeda

Maxay tahay?

Dumar badan ayaa arki doona tima goíd uurka ka dib. Hormoonka siyaada waqtiga uurka la leeyahay ayaa wuxuu is bedel ku keena maqaarka iyo meela badan oo kale oo jirka ka mid ah. Waxay ka dhigaan dhamaan timaha madaxa kuwa so baxaya. Sidaas darted dumar badan ayaa dareemaya in timahoodu soo xoogaysanayaan inta uurka lagu jiro.

Dhalitaanka ilmaha ka dib timaha badankood way joojiyaan koritaankii waxayna galaan xilli nasasho xaalladaas oo ay ku jiraan laba ama saddex bilood. Marka wareegii koritaanka timuhu bilawdaan mar kale, timuhu waxay gadaal ugu noqdaan heerkii koritaanka timihii horena waa daataan hal mar. Qiyaasta goáysa way isbedeshaa waxayna ku xiran tahay shakhsiga, dumarka qaarkoodna way kaga badan yihiin kuwa kale. Haddii uu horayba u jiray in qofku hido xagga qoysk ah u leeyahay in timuhu ka goáan, tima goída waxaa laga garan karaa dhalashada ilmaha ka dib.

Tima goída waqtiga hore waxay badanaa ku dhamaataa laba ilaa saddex bilood ka dibna timuhu waxay bilaabaan inay soo baxaan. Dumarka badankood, timuhu waxay ku soo noqdaan heerkoodii hore uurka ka hor.

Sidee lagu daaweeyaa?

Wax dawa ah oo muhiim ahi ma jirto tima goída mudaysan. Badanaa waa isbedel aan joogta ahayn oo timuhu koraan inta lagu jiro xilliga uurka la leeyahay.

Shanlaynta siyaadada ah ayaa goysa timaha waxayna dedejinaysaa timagoída awal qaadan lahayd laba ilaa saddex bilood inay ku goáan. Haddii taasi dhacdo timaha sina wax u yeelli mayso. Qaadashada fiitamiinka ama salaaxidu wax macna ah oo ay u samaynaysaa ma jirto. Dumarka qaarkood tima goída mudaysan waxay ku dhacdaa uur kasta ka dib.

Somali - Postpartum Hair Loss

Macluumaadka intaas ka badan weydii

Kalkaaliyahaaga caafimaadka hooyada iyo ilmaha.

Dhakhtarkaaga.

Dhakhtarka hooyada uurka leh.

© 2002, Department of Dermatology, St. Vincent's Hospital Melbourne, Victoria Parade, Fitzroy, Victoria 3065 Australia.